

## Somali

# **Ka Ashtakoodka Turjubaanka** (Interpreter Complaint Report) **Akhbaarta Guud iyo Tilmaamaha** (General Information and Instructions)

### **Ciddee ayaa Ashtakoon karta?**

- Shakhsiga(yaadka) helaya adeegyadda turjubaanka, shaqaalaha maxkamadda iyo qoladii kale ee ku lug leh dacwadda.

Sidda waafaqsan Xeerka Maamulka 50 Qaybtiisa 5(c) [Administrative Rule 50 Section 5(c)], diidmadda qofka turjubaanka kuu ah aad diidayso waa in lagu sameeyaa inta aan la dhaafan waqtiga diidmada lagu sameyn karo. Diidmooyinka turjubaanka waxaa la sameyn karaa xilliga maxkamadda la qaadayo ama 48-saac gudahood waqtiga dhagaysiga dacwadda.

### **Ashtakaddu Maxay ku Saabsanaan Kartaa?**

Ashtakooyinka ku taxaluqa turjubaan waxa ay ku kooban yihiin kuwan soo socda sidda uu dhigayo xeerka ganaaxa qodobkiisa AR50:

1. Uusan awoodin inuu si quman uu u turjumo waxa laga hadlayo xilliga maxkamaddu socoto;
2. Ogaal u turjumid wax been-abuur ah;
3. Ogaal u bixin akhbaar qarsoodi ah ama dad gaar ah kaliya loo ogol yahay inay helaan oo uu helay intii uu ahaa turjubaanka;
4. Ogaal uga soo bixid la'aan soo sheegida dano is diidan oo carqaladeynaya awoodida inuu bixiyo turjumid buuxda oo sugan; ama
5. Imaansho la'aanshaha waqtigii loo qabtay inuu yimaado iyadoon sabab maqnaasha ahi aysan jirin.

Waa aad soo sheegi kartaa turjubaan wixii uu ba'iyu intii uu turjumayey, ka kor intii uusan turjumida bilaabin, ama ka dib kolkii uu bixiyey adeeg turjumid ah. Haddii aadan ku arag dhibaataada aad rabto inaad soo sheegto liiska, wali waa aad buuxin kartaa koomka.

### **Ciddee Ayaan u Dhiibaa Foomka Ashtakadda?**

Fadlan ku soo dir Foomka Warbixinta Ashtakadda iyo wixii kale ee qoraalo ah ee gargaaraya ama akhbaar kale ah barta: [languageaccesscoordinator@ndcourts.gov](mailto:languageaccesscoordinator@ndcourts.gov)

### **Ka Waran Haddii aad u Baahan Tahay in Foomka Ashtakadda waxa Ku Qoran La Turjumo?**

Haddii aad u baahan tahay in foomkaaga ashtakadda la turjumo fadlan kala xiriir Xiriiriyaha Keenida Turjumaanadda barta [languageaccesscoordinator@ndcourts.gov](mailto:languageaccesscoordinator@ndcourts.gov) ama wac khadka 701-451-6940 si aad uga qabsato balan. Barnaamijka Turjumaadda ee Maxkamaada ayaa noo keeni turjubaan naga caawiya inaan kula hadalno. Fadlan nala socodsii afka aad ku hadasho. ***Ma aha inaad bixiso kharajka turjubaanka.***

## Somali

### **Ka Dib Kolkaa Maxaa Dhici?**

- Xiriiriyaha Keenida Turjumaanadda ayaa eegi ashtakadda. Waxaa dhici karta inuu ku waydiisto akhbaar kale.
- Xiriiriyaha Keenida Turjumaanadda waxa dhici karta inay isla eegaan ashtakadda xaakimka, shaqaalaha maxkamadda iyo turjubaanka ashtakaddu quseeyso.
- Turjubaanka waxaa lala socodsiin doonaa ashtakada ka dhanka ah iyo nidaamka ganaaxa. Waxaa lagula socodsiin doonaa natiijooyinka ka soo baxa baarida iyo wixii go'aan ah ee la gaaro ee ku taxaluqa ashtakadda.

### **Ma Jirtaa Akhbaar kale oo ku Saabsan Nidaamka Ashtakadda**

Waxa aad ka heli kartaa akhbaar kale oo ku saabsan Nidaamka Ganaaxida Turjubaanka ee Maxkamadda barta <https://www.ndcourts.gov/district-court/court-interpreters>